

## AGAASIMIDA AASKA MUSLIMIINTA EE DALKA FINLAND

إِنَّا لِلّٰهِ وَإِنَّا إِلَيْهِ رَاجِعُونَ

-Qur'aan 2:156-

Marku geeriyooda qof qaarabada ah ama qof kuu dhow waa waqti aad u adag. Waana xaalada na xasuusineyso awoodda Alle iyo ajasha na sugayso. Qofkii aa taqaanay kulama joogo oo waxuu bilaabay safar uu aakhiro ku aaday.

Kasakow xanuunka iyo murugada na qabaneyso waa inaan awoodnaa in aan qaban qaabino aaska qofki aan jecleyn si dhaqsa ah. Halkan waxaan idiinku heynaa wadooyinka ama qodobo kuu fududeynayo waqtigaas adag insha allah.

Allah ha u naxariisto hana cafiyo marxuumka, adinkana samir iyo iimaan ha idinka siiyo , aamiin.

### MAALINTA GEERIDU DHACDO

- Dhaqtarka ayaa ku qorayo isbitaalka cadeynta inuu geeriyooda qofka iyo fasax in la aasi karo.
- La xiriir masjidka kuu dhow ama qofka kaa caawin karo qabanqaabinta aaska, dhaqitaanka meydka iyo janaasada.h
- Wac xafiiska aaska. Waxaa kaloo wacdaa xafiiska ceyrta ama soshalka hadii aad u baahantahay caawinaad xagga dhaqaalaha ama qarashka aaska. Xafiiska aaska ayaa qaabilsan qaadista meydka isbitaalka illaa qabriga. Waxey kaloo kaa caawin karaan dukumintiyada iyo waxyaabaha ku saabsan dhaxalka. Ogow laakiin in ay lacag dheeraad ah kaaga qaadan karaan adeegyada dheeraadka ah.
- Waa in aad soo iibisaa karfanta meydka loo xirayo. Dukaanka la yiraahdo Eurokangas ayaa iibiyo marada cad. Ragga waxaa ku filan illaa 8 mitir oo karfan, dumarkana 10 mitir oo karfan ah. Waxaa laga yaabaa in cabirka ama sizeka is badalo, waxey ku xirantahay qofka geeriyooday in ta uu la egyahay.
- Hana iloobin inaad la socodsiiiso ehelada iyo asxaabta geerida ku timid ehelkooda.

### MAALINTA AASKA

- U keen karfanta dadka qaabilsan dhaqitaanka meydka. Dhaqitaanka meydak waxey ka dhacdaa isbitaalka. Meydka waxaa la dhaqaa maalinta aaska.
- Hadduu jiro qof ka mid ah qaraabada ama asxaabta oo doonayo inuu ka qeybqaato dhaqitaanka meydka, waxaa fiican in uu la socodsiiyo una sheego waqti hore dadka qaabilsan dhaqitaanka, sababtoo ah waa loo baahanyahay gacmo dheeraad ah.

## **ISBUUCA GUDIHIISA.**

- Ka Dalab warqada ragisterka (virkatodistus) xafiiska maistraatiga. Waraadaas waxey muhiim u tahay sida xeritaan bangiga iyo qeybinta dhaxalka qofka geeriyooday.
- waxaad xirtaa ama kansashaa kontaraktiyada sida mobilka iyo tabletka. Xafiiska rajistarka qaranka ayaa si toos ah uga helaa isbitaalka warbixinta geerida, ayaga ayaa la socodsiinayo bangiga si loo xiro kaararka bangiga.
- Xir taleefanka iyo heshiiska internetka qofka geeriyooday.
- La xiriir xafiiska Kelada hadii ay jiraan beeshinka ama lacagta qofka laga geeriyooday ama beeshinka familka xaq u leeyihiin.

## **3 BILOOD KUDAHOODA**

- Sedex bilood kudahooda waa in la la xariiraa xafiiska qaabilsan dhaxalsiinta. Waxaana fiican in qof aqoon u leh leh shaqadaas loo qabto haddii qofka dintay uu lahaa hanti fara badan. Xafiiskaas ayaa aqbalaayo oo cadeynaayo dukumintiyada xafiiska canshuurta ayaa sheegayo canshuurta laga bixinayo hantidaas.

## **WAXYAABAHA LOO BAAHAN IN LA XUUSNAADO**

- Xasuusnow inaa u duceyso meydka.
- Wac masjidka kuu dhow ama la xiriir numberka hoos ku qoran
- La xiriir xafiiska ceyrta ma soshalka hadii aad u baahantahay caawin dhaqaalaha aaska.
- Ogeysii qaraabada iyo asxaabta geerida.
- Ka bixi deynta lagu leeyahay marxuumka inta aan la aasin hadii ay macquul tahay.
- Soo iibi karfanta ka hor maalinta la dhaqayo meydka.
- Ka dalab warqadda registerka dhamaan meelaha uu ku noolaan jiray marxuumka. La xariir qof profeshin u leh arimahaas haddii loo baahdo

